Australian Government
Department of Education and Training

Ka baro Ingiriiska Barnaamijka Dadka waaweyn ee Soogalootiga ah (Adult Migrant English Program)

The Adult Migrant English Program

Ingiriisku waa afka qaranka Australiya. Dadka Australia joogaa waxay ku hadlaan luuqado badan, laakiinse ku hadlida iyo fahmida Ingiriisku waxay kaa caawin doontaa inaad si buuxda uga qaybqaadato nolosha Australia. Ingiriis la'aan, waxaad kala kulmi doontaa dhib inaad hesho Dhalashada Australia, helitaanka adeegyo muhiim ah iyo inaad noqoto qof madax bannaan.

Si lagaga caawiyo inaad Ingiriiska barato, waxaa laga yaabaa inaad tagto Adult Migrant English Program (AMEP).

Waa maxay AMEP?

AMEP waxaa maalgeliya Dawladda Australiya (Australian Government) wuxuuna bixiyaa ilaa 510 saacadood oo ah fasalo afka Ingiriiska ah oo bilaash u ah dadka ku soo gala bani'aadamnimada iyo soogalootiga xaqa u leh. Haddii lagu siiyey fiiso joogta ah ama visa ku meelgaar ah oo xaq u leh oo aad ku hadasho Ingiriis yar amaba aadan ku hadli Karin, waxaa laga yaabaa inaad xaq u leedahay AMEP. Dhalinyarada soogalootiga qaarkood oo da'doodu u dhaxeyso 15 ilaa 17 sanno ayaa sidoo kale laga yaabaa inay xaq u leeyihiin.

Fasalka AMEP , waxaad ku baran doontaa xirfadaha luuqada Ingiriiska iyo macluumaad ku saabsan bulshada Australia. Waxaad la kulmi doontaa dadkale oo dhowaan yimid waxaana laga yaabaa inaad saaxiibo cusub sameysato. Tan oo wada jirta waxay adiga iyo qoyskaagaba kaa caawineysaa inaad si guul leh u degtaan Australia. Xirfadaha luuqada Ingiriiska ayaa sidoo kale ah wax muhiim ah haddii aad jeceshahay inaad Australia ka shaqeyso.

AMEP waxaa bixiya adeeg bixiyayaal la aqoonsan yahay waxaana dhiga macalimiin u tababaran inay Ingiriiska u dhigaan dadka ku hadla luuqadaha kale.

Sidee baan isu qoraa?

Si aad uga hesho cashada luuqada Ingiriiska AMEP, waa inaad iska diiwaangelisaa adeeg bixiye AMEP oo la aqoonsan yahay lix bilood gudahood markaad Australia timaado ama markay fiisahu kuu bilaabanto. Waa inaad bilowdaa fasalada Ingiriiska 12 bilood gudahood markaad Australia timaado ama laga bilaabo marka fiisahu kuu bilowdo.

Waxaad heysataa shan sanno laga soo bilaabo taariikhdaad Australia timid ama maanlinta fiisahu kuu bilaabmay inaad Ingiriiska ka barato AMEP. Waxaa laga yaabaa inaad xaq u leedahay casharo dheeraad ah iyadoo ku xiran baahidaada.

Adeeg bixiyahaaga ayaa kaa caawin doona doorashada fasalka baahidaada ku haboon si uu kaaga caawiyo hubinta natiijada suurtagalka ah ee kuugu fiican. Waxaa jira fasallo wakhti buuxa iyo kuwo wakhti dhiman wakhtiyo kala duwan si aad u baratid goorta iyo goobta kugu haboon adiga.

Fasalada jira (Tuition streams)

Si sifiican loogu fuliyo baahidaada, adeeg bixiyahaaga AMEP ayaa kaa caawin doona inaad kala doorato laba fasal:

- Fasalka Ingiriiska Shaqada ka hor – ee loogu talagalay macaamiisha jecel inay helaan Ingiriis ay ku shaqeystaan si ay uga qaybgalaan goobaha shaqada, ama tababar dheeraad ah oo laga yaabo inuu kuu hago shaqo aad heysan karto.
- Fasalka Ingiriiska bulshada – ee loogu talagalay macaamiisha raba inay hagaajiyaan awoodooda Ingiriiska lagu sheekaysto si uu uga caawiyo inuu ka qaybgalo bulsho ahaan oo uu helo kalsooni uu ugu noolaado si madax bannaan bulshada xaafadooda.

Waxaa laga yaabaa inaad isticmaasho 510 saacadood ee sharciyeysan ee aad xaqa u leedahay labada fasal midkood ama aad labadaba isku darto.

Macaamiisha qaata taageerada lacageed ee leh shuruuda waajibaadka labada dhinaca ah xaq uma yeelan doonaan fasalka Ingiriiska Bulshada.

Ka waran haddii aanan fasalka tegi karin?

Haddii aadan fasalkaaga tegi karin, la hadal adeeg bixiyahaaga AMEP . Waxaa laga yaabaa in adeeg bixiyahaagu inuu awoodo inuu kaa caawiyo Ingiriis ku barashada macalim ka guriga ama interneetka oo leh fogaan wax ku warashada macalimku caawinayo ee AMEP .

Waxaad sidoo kale u baran kartaa sidii aad awoodo adoo isticmaalaya cutubyada AMEP barashada intaad adigu awoodo ee www.amepdl.net.au. Casharadaan bilaashka ah waxaa heli kara qof kasta (ma aha oo kaliya macaamiisha AMEP) si loo caawiyo in dadka Ingiriiska bartaan.

Barnaamijyada hoos yimaada AMEP

Waxaa laga yaabaa inaad xaq u leedahay fasal dheeraad ah haddii aad leedhay baahi khaas ah.

Barnaamijka Diyaargarowka khaaska ah (Special Preparatory Program)

Special Preparatory Program (SPP) wuxuu siiyaa saacado dheeraad ah iyo taageero dadka bani'aadanimada ku soo galay ee xaqa u leh ee dhibta ka soo maray soo socdaalida ka hor leh dugsi dhigasho xaddidan.

Degitaanka Marinada luuqad Tababarka iyo Shaqada (Settlement Language Pathways to Employment and Training)

Settlement Language Pathways to Employment and Training (SLPET) wuxuu siinayaa ardeyda xaq u leh koorso xoogga saareysa shaqada si ay uga caawiso barashada Ingiriiska khaasku ah shaqada iyagoo helaya inay bartaan sida wax looga qabto iyo dhaqanka goobta shaqada ee Australia.

SLPET waxay bixisaa ilaa iyo 200 oo saacadood oo dheeraad ah fasalka luuqada Ingiriiska ah ee khaas ku ah shaqada, oo ay ku jirto 80 saacadood oo ku meelaynta khibrad shaqo helida mihnado fara badan oo kala duwan.

Fidinta AMEP (AMEP Extend)

AMEP Extend wuxuu siiyaa ilaa iyo 490 saacadood oo ah fasalo dheeraad ah ardeyda xaqa u leh ee dhammeystay xaq u yeelashada 510 ka saacadood ee aan gaarin ujeedooyinkoodii ay Ingiriiska si fiican ugu baran lahaayeen.

Xannaanada caruurta ee AMEP (AMEP child care)

Adeeg bixiyahaaga AMEP ayaa kuugu balamin kara xannaano carruureed bilaash ah carruurtaada markaad dhiganeyso fasalka. Xannaanada carruurta ee bilaashka ah waxaa la siinayaa carruurta ka yar da'da dugsiga.

Hannuuninta marinka AMEP (AMEP pathway guidance)

Adeeg bixinayaha AMEP wuxuu bixiyaa hannuuninta marinada si ay kaaga caawiso dejinta ujeedooyinkaaga, fahmida tallaabooyinkaaga iyo inaad go'aan gaartid la xiriira fasalkaaga, fursadaha shaqada iyo waxbarashada dheeraadka ah.

Wixii macluumaad dheeraad ah

AMEP	Faahfaahinta xiriirka
Taleefanka	13 38 73
AMEP Website	www.education.gov.au/amep
IImeyl	skilling@education.gov.au
Macluumaadka luuqadhaa aan ingiriiska ahayn	www.education.gov.au/amep-information-other-languages
Xaggee baan ka baran karaa Ingiriis? Xarumaha waxbarashada iyo bixiyayaasha AMEP	www.education.gov.au/adult-migrant-english-program-service-providers
AMEP online	www.amepdl.net.au